

# GUURKA QASABKA A'

## GUURKAAYGA, DOORASHAD- AAYDA!



BRUXELLES POUVOIRS LOCAUX  
BRUSSEL PLAATSELIJKE BESTUREN  
SERVICE PUBLIC RÉGIONAL DE BRUXELLES  
GEWESTELIJKE OVERHEIDS Dienst BRUSSEL

WAXAAD DAREENTAA  
MARARKA QAARKOOD  
SHUCUUR IS  
BURINAAYSA,WAXAAD  
DAREEMAYSA IN AAD  
HALOWSANTAHAY ?

WAXA AAD  
IS WEEYDIISAA  
SU'AALO BADAN,  
GARAN MAAYSID WAX  
AAD

WAXA LAGA HADLAYAA  
BARNAAMIJ GUURKA  
A',GUURKAAGA A' ?



> *Buugani waxa uu u janjeedha haweenka,waayo wuxuu u jeedaa hablaha dhalinta a',la soo darsaan dhibaatooyinka guurarka qasabka a'. Balse raga iyo dadka tirada yar ee aay saameeyn karto,warbixino muhiim a' ayeey ka heli karaan buugan.*

# KOOBAN

I.	HADDII GUUR LAGU TALO JIRO, MAXAA LA YEELI ? .....	5
A.	Guurka madaniga a' Beljimka.....	5
B.	Guur loogu talo galay dibada .....	8
C.	Kaa qaaditaanka sharcigaaga .....	9
D.	Sharciga degenaanshaha ee ku lifaaqan guurka ?.....	10
II.	GUURKA.....	15
III.	GUURKA QASABKA A'.....	17
A.	Guurka qasabka ihi waa dhib u gaar ' dad gaar a' .....	20
B.	Sobobaha la sheegto si guurka qasab looga dhigo .....	22
C.	Waa maxay awaaqibyada ka dhasha guurka qasabka a' ?.....	28
IV.	GUURKA HORTII CALAAMADAHA DIGNIINTA .....	31
V.	UGU DANBEEYN .....	37



# HADDII GUUR LAGU TALO JIRO, MAXAA LA YEELI ?

## A. GUURKA MADANIGA A' BELJIMKA

Kuwa raba in aay is nikaaxaan waa in aay u sheegaan ugu yaraa 14 cisho ka hor taariikhda guurka sarkaalka xafiiska arimaha madaniga. Ilaa maalinta guurka,joojin waa la codsan karaa.(labada qof mid ahaan,amaa waalidka ama dad kale oo u dhoow haddii waalidku maqan yahay ). Laakiin waa in aad la timaad sobobo<sup>1</sup>. Balse waa in sobob lloo sameeyo taas.

Xaflada guurku waxa aay ka dhacdaa maamulka degmada ugu horrey 14 cisho ugu danbeeyna 6 mois kabacdi sheegista waxana goob joog ka a' duqa magaalada iyo sarkaalka arimaha madaniga.

Kabacdi sarkaalka arima madaniga waxa uu weeydiyaa kolma mid labada is nikaaxaaysa in uu ka kale ogol yahay. Sarkaalku markaas waxa uu sameeyaa warqada nikaaxa,iyo buuga lagu dhigu doono caruurta ka dhalata ama waxa siisa makanisda guurka diiniga ihi ka dhaco. Warbixino intaas ka badan waxaad ka heli shabakadaBelgium.be<sup>2</sup>

Duqa magaalada,sarkaalka arimaha madaniga iyo xafiiskooduba waay ogyihiin jiritaanka guurka qasbka a' iyo dhibaatooyinka ka iman kara. Madaamaa guurka qasabka ihi yahay mamnuuc,waay

---

1 <https://www.actualitesdroitbelge.be/droit-de-la-famille/mariage/le-mariage/la-celebration-du-mariage>

2 <https://www.belgium.be/fr/famille/couple/mariage/formalites>

u dhaga nuglaanayaan calaamadaha tilmaami kari waayna hor joogsan karaan.

Marka nikaaxa:

Maadaamaa lagula socdo,muhimadu waxa aay tahay in aad hesho fursad aad keli kula hadasho qof maamulka ka mid a' Waxa markaas suurto gal noqon karta in maamulku is hor taago daqiiqada un dan beeysa isaga oo ku mar-marsiyoon kara warqadan ma dhana, iyo wax kale oo lahal maala.

Haddii aay dhacdo in aad si gaar a' ugala haddli kari weeydo qof daawlada a',waa in aad isticmaasho ka hadlka jidhka,adiga oo muujinaya diidmadaada:ha qoslin,madaxa foorari,u muuqo qof baxsid ku jira...waxaax oo dhan waa tilmamo baraaruujin kara. Wuxaad sidoo kale u yeeri kartaa la -taliyahaaga, ku samee dhaqdhaqaqyada madaxa, dhaqdhaqaqyo miyir leh gacmahaaga...

Sheegitaanka nikaaxa iyo dhicista nikaaxa:

waxa aad haaysataa 14 cisho si aad ugu noqoto xafiiska degmada oo aad isku hor taagto guurka.

Marka nikaaxu socdo :

Is-hortaagu wuu adag yahay marka aad eegto dadka badan ee jooga laakiin haddana waad is-hortaagi kartaa inta aan aaydaan is weeydaarshan ogolaanshaha.

## Guurka ka dib:

Waad baabiin kartaa leeynoo ma waafaqsana sharciga beljimka.

Guurka waxa aad u masaxi karta si aanow weligii dhicin, calaamado ka hadhayaana ma jiran oo wuu ka fudud yahay furitaanka.

Si kaste ha noqotee, si aad u baabiiso guurka waa in aad soo caddeeyso in guurku qasab ahaa (sidaas darteed waa in aad xajisato wixii caddeeyn a', warqado, maieeylal, sms, sawir...) dacwadu waa culeeys. Laakiin waa lagaa garbin karaa.



## B. GUUR LOOGU TALO GALAY DIBADA

**Waxa lagu talo jira safar dibada a' oo aad u raacdo reerka,waxad ka cabsi qabta guur qasab a' ?**

Ogeeysii xafiisyada tahkasuska ku a' ee ku garbiya (waxa aad ka heli cinwaanada pageka 10), iyo qof aad ku kalsoontahay in aad ka cabsi qabto guur qasab a' kana war-war qabto in aanad dib ugu soo noqon beljimka.

Waxa aad sameeyn kartaa aanad siin kartaa,tilmaam a' haddii mudadaa lagu waayo in daawlada lala xiriyo si laguu soo helo.

**MUHIIM :** Waxa kale ood siin kartaa sawiro warqadaha sharciga a' iyo warbixino ku saabsan :

- > Safarka : taariikhda safarka,saacada,lambarka dulimaatka sawirka tikitka.....;
- > Degenaanshaha : cinwaanka - cidda ku raacaysa iyo dad halkaas lagaala soo xiriiri karo oo halkaas degan (magaca, ka waalidka, cinwaanka...)
- > Fantasiye/xaflad lagu talo galay : Meesha lagu qaban iyo taariikhda ;
- > Dadka kuu dhoow : cilwaanada ahliga ku hadhay beljimka.

## C. KAA QAADITAANKA SHARCIGAAGA

**Waxaad ku sugar tahay dibada waxana lagaa qaatay sharcigaagii:**

- > Wxaad aad tahay beljim,la xiriir safiirka/qusulka beljimka ee halkaas<sup>3</sup>. Wxa lagu siin karaa paas kuu saamaxa in aad ku soo noqoto beljimka. Doon-doon xafidna cilwaanadooda iyo lambaradooda( kolba dalka aad tageeyso);
- > Haddii aanad beljim ahaayn,waxaad u tagi karta booliska ood u sheegi karta in lagaa xaday sharcigii. Wxa kale oo aad la soo xiriiri karta maamulka degmadaada beljimka kana codsan kartaa in aay kuu soo diraan warqad degenaansho oo aad ka doonatis saraarada/qusuliyada beljimka dalkaad joogto. Wxaad ka dalban kartaa oo kale safaarada/qusuliyada beljimka baasboor jadiid a' ama fiiso kuu saamixi kara in aad ku noqoto beljimkii.. Doon-doon oo weliba xafid cilwaanadooda iyo lambarada telefoonada (kolba dalka aad tageeyso ama aad joogtid).

---


<sup>3</sup> [https://diplomatie.belgium.be/fr/Services/Ambassades\\_et\\_consulats/ambassades\\_et\\_consulats\\_belges\\_a\\_Letrange](https://diplomatie.belgium.be/fr/Services/Ambassades_et_consulats/ambassades_et_consulats_belges_a_Letrange)

## D. SHARCIGA DEGENAANSHAHAA EE KU LIFAAQAN GUURKA ?

Haddiise uu ku xiran yahay guurka waa in aad u tagtaa oo aad la xiriirtaa haayadaha takhasuska ku a' oo kula eegi dooni wixii xalal a' ee suurto gal a'. Hoos ayaad ka heli cinwaanada :



**Macluumaadkaas oo dhan waa  
bilaash sirtana laguu xajinayo**



---

## Cinwaanada xafiisyada gargaarka ee Gobolka Bruxelles

---

### **Réseau Mariage et Migration (Khadka Guurka iyo haadjiraada)**

Rue de l'Alliance 20  
1210 Bruxelles - 02/241.91.45  
info@mariagemigration.org  
<http://www.mariagemigration.org/>

---

### **La Voix Des Femmes (Codka haweenka)**

Rue de l'Alliance 20  
1210 Saint-Josse - 02/218.77.87  
lvdf@lavoixdesfemmes.org  
<https://lavoixdesfemmes.org/>

---

### **EXIL (Tahriib)**

Avenue de la Couronne 282  
1050 Bruxelles - 02/534.53.30  
info@exil.be  
<https://www.guidesocial.be/exilasbl/>

---

### **Booliska: Coordination Mariages Forcés (Isuduwiida guurka qasbka a')**

02/249.25.33  
cmfzonebruno@gmail.com

### **Planning Marolles (Qorshaaynta Marolles)**

Rue de la Roue 21  
1000 Bruxelles - 02/511.29.90  
planningmarolles@skynet.be  
<http://planningmarolles.be/index.php/fr/>

---

Haddii aay kugu dhacday  
ama aad ka cabsi qabto in  
uu ku dhaco gudniin:

### **GAMS Belgique (Ururka la dagaalanka gudniinka)**

Rue Gabrielle Petit 6  
1080 Molenbeek-Saint-Jean  
02/219.43.40  
info@gams.be - <http://gams.be>

---

### **Intact ASBL (Ururka «Dhaawrsan»)**

Rue des Palais 154  
1030 Bruxelles  
02/539.02.04  
contact@intact-association.org  
<https://www.intact-association.org/>

Haddii aay kugu dhacday  
ama aad ka cabsi qabto  
dhibaatooyin:

*Centre de Prévention des  
Violences Conjugales et  
Familiales (Xarunta ka hortaga  
rabshadaha dadka isqaba iyo  
qoosyada)*

Boulevard de l'Abattoir 27-28  
1000 Bruxelles - 02/539.27.44  
violences.familiales@misc.  
irisnet.be

[https://www.  
ecouteviolencesconjugales.be/](https://www.ecouteviolencesconjugales.be/)

—  
**Centre de Prise en charge des  
Violences Sexuelles (Xarunta  
daryeelka xadgudubka  
galmada)**

*CHU Saint-Pierre*

Rue Haute 322 - 1000 Bruxelles  
02/535.47.14 - 02/535.45.42  
CPVS@stpierre-bru.be  
24/7

[https://www.stpierre-bru.be/fr/  
services-medicaux/gynecologie-  
obstetrique/320-rue-haute-1/  
centre-de-prise-en-charge-des-  
violences-sexuelles-1](https://www.stpierre-bru.be/fr/services-medicaux/gynecologie-obstetrique/320-rue-haute-1/centre-de-prise-en-charge-des-violences-sexuelles-1)

Pour les mineurs  
SOS enfants-ULB  
(Caruurta da'da yar SOS  
caruurta- ULB)

*CHU Saint-Pierre*

Rue Haute 322  
1000 Bruxelles  
02/535.34.25  
sosulb@ulb.ac.be  
[https://sos-enfants.ulb.  
ac.be/](https://sos-enfants.ulb.ac.be/)

**khadad lagu dhegeeysto ( koolal bilaash a' ):**

**Réseau Mariage et Migration**

**(Shabakada guurka iyo socdaalka):**

0800/90.901

Isn'iin,salaasa,jimce laga bilaabo 10 saac ilaa 16 saac  
Arbaca,khamiis laga bilaabo 10 saac ilaa 13 saac

**Ecoute violence conjugale**

**(dhageeysi dhibta qoyska) :** 0800/30.030 (24H/24)

**Service Ecoute-Enfants**

**(Xafiiska dhegeeysiiga - caruurta):** 103 (24H/24)

**Télé-accueil**

**(Soo dhaweynta talefanka):** 107 (24H/24)

**Écoute Jeunes**

**(dheggeysiiga dhalinta) :** 078/15.44.22 (24H/24)

**khadad lagu dhegeeysto (koolal bilaash a'):**

**Booliska:** xaalada deg-dega a' beljimka  
dhexdiisa.

**Deg-dega:** 112 xaalada deg-dega a' iyo  
gardara,yurub oo dhan.

112 BE-App: Moobaaylka  
Wada hadal suurto gal a'  
shabakada  
<https://www.112.be/fr/app>

**Khadka interneetka:**

<http://monmariagemappartient.be>

<https://mariages-forces.be/le-mariage-force/>

<https://www.ecouteviolencesconjugales.be/>

<https://www.we-access.eu/fr> (heerka yurub laakiin  
khariidaddu waxaay kuu soo jiidi karta Bruxelles)



II.

## GUURKA...

Guurku waa fici laba qof ,oo kala duwan ama isku mid ihi aay ku aasaasayaan midow dhexdooda a'. Guurku waa axdi adag oo u dhixeeya laba qof,bulshadeena dhexdeedana,waxa uu ka turjuma jacaayl iyo doorasho xor a' (taas oo aan sidaas u dhici jirin baryihii hore ).

Beljimka,waxa jra dhaawr shuruudood si aay laba qof isku guursan karaan:

- > Ugu yaraan waa in aad ahaato 18 jir;
- > Xiriir ahlinimo aanaw jirin (wiilal ama hablo aad wallaalo ama ilma adeer tiihiin....);
- > In aad madax banaantahay (Waa mamnuuc in dhaawr dumar a' ama rag a' la isku qabo );
- > aad bixiso **ogolaansho xor a' oo cad.**

Guurka madaniga a' (*sharchiyeysan*) waxa lagu qabtaa degmada.

Guurka diiniga ama dhaqmeedka (oo kuu furan) waa in si qasab a' uu dhaco guurka baladiga dabadeed qiimo qaaynuuni a' oo uu leeyayahyna ma jirto.

Waxa jira noocyoo kala duwan oo guurka a':Guurka jacaaylka,guurka iska yeelka(warqado lagu doonayo)guurka caawlan((labada qof midi daacad ahaayn oo keliya dani ugu jirto),guurka diiniga ama dhaqmeedka,guurka habeeyasan(reerku doortay labada qofna ogal yihiin aanay diidi karaan),guurka deg-dega a'(18 jir ka hor),guurka qasabka a'(Ugu yaraan mid aanow ogaleeyn labada qof ee isguur sanaaysa).

III.



## GUURKA QASABKA A'

« *Guurku ma ansaxsana[] marka aan labada is nikaa xaaysaa si xor a' aanay isko ogoleeyn ama ogolaanshuha mikood uu qasab iyo hatigaad ku yimid.* » (qodobka 146 ter ee sharciga madaniga a' ee Beljimka).

Ogolaansho macnaheegu waxa uu yahay in aad raali ka tahay.

Shuruudaha la xidhiidha guurka,ogolaanshuu waa in uu ahaado mid **xor a' oo cad**,macnuhu waxa weeyi in aad heshay warbixino muhiim a',aanad heshay fursad wakhti aad ka fikirto *iyada oo weliba cid kale aanay ku rabushin* si go'aan kuu gaar a' aad u qaadato (Amnesty jeunes - 2020).

Guurka markaas ogolaansho jirin ee qasabka a' sharcigu wuu mamnuucay : « *Qofka qof kale ku qasbaa guur waxa uu mudan karaa xadhig saddex bilood ilaa shan sano a' iyo ganaax 250 ilaa shan kun oo 5000 euro a'. Isku day guur qasab a' waxa uu keeni kara xadhig u dhigma laba bilood ila saddex sano iyo ganaax a' 125 ilaa 2500 oo euros* »<sup>4</sup>.

---

<sup>4</sup> Qodobka 391 sexies ee xeerka ciqaabta

>> Ogolaanshahaagii ma la qadariyey ? Waa kuwan dhaawr dariiqadood oo aad kaga jawaabi karto :

1. Ogolaanshahaagu ma ahaa **ku adiga kaa soo go'ay** ? Si dhab a' ma u rajeeyneeysey, shaqsi ahaan ?
2. Waalidkaa ama odeygaaga mustaqbalku ma hubiyeen in doorashadaadu **caddahay** ? Ma **odhan karo maay** macnaheegu maaha waxaan idhi haa !
3. Awood **buuxda ma u lahaayd ogolaanshaha** ? Adiga oo haaysta warbixinada muhiimka a', iyo wakhti aad ku fikirto bilaa warwar iyo cadaadis ?
4. Fursad iyo wakhti ma u heshay in aad qaayb kasta ka dhiibato ogolaanshahaaga ? Ogoloow in aad mar nin la kulanto, macnaheegu maaha waan ogolahay in aan guursado marka xigta ama aay qasab igu noqoto .
5. Ogolaanshaha waa **la noqon karaa** : waxa suurto gal a' in aad badasho raaygaaga oo aad go'aansato marka danbe in aad tidhaa maay.

**Marka aay tahay guur qasab a,’ lama qadariyo ogolaanshaha gabadha da’da yar.**

Mararka qaarkood waxa dhacda in gabadhu aay u haaysato in aay ka qaayb qaadatay xaflad reerka a’ iyada oo aan waxba ka ogeeyn in xafladani aay tahay *carooskeedii*.

Gabdhaa intooda badan maba oga in la nikaaxay - markaas lama kulmaan hanjabaad , dhalan hababis laakiin lama weeydiin ogolaanshahoogii, *sidaas darteed waa guur qasab a’*.



## A. GUURKA QASABKA IHU WAA DHIB U GAAR ' DAD GAAR A'

Hablaha ayuuna si xoog a' oo ka duwan wiilasha u saameeyaa, waxa uu yahay ***dhib khaas a'***.

**Waxa gaar a'** waxa aay tilmaami ficolka,dhaqanka,xidhiidhada bulsho ee uu mushtamac garto in gaar aay u tahay dumarka iyo ragga ( waa dhismo bulsho).

Dhibaatooyinka jinsigu waxa uu si toos u saameeynayaa qof marla aay tahay ***jinsigiisa*** (faraqa u dhexeeya dumarka iyo ragga) ficolka laga suaayo mustamaca dhexdiisa (***mabaadiida ku saleysan jinsiga***).

Tusaalo mabaadiida ku saleysan hablaha : qurux badnaato,raaliya noqoto,xurmaayso dadka kale.....wiilasha : xoog yahay,weligii ooyin,awoodna yeesho...

Muxuu yahay kala duwanaanshaha hablaha iyo wiilashu ?

Sobobtu waxa weeyi habalaha iyo wiilasha waxa aay u xil saaran yihin haawlo kala duwan laga bilaabo marka aay dhashaan sidaas darteed xiriirka haweenka iyo raggu ma aha ku siman. Waxa we ***raggu dul maro haweenka*** eyi xiriir lagu kala awood badan yahay ***loona yaqaan aabbenimada***.

Taasi waxa aay keentay,in ila hadda,reeraha ama qoomiyadaha qaarkood u arkaan hablaha iyo dumarka dad nolol ahaan hooseeya,umana arkaan in aay madax banaanaan karaan ama xor noqon karaan oo aay weliba ka daran tahay marka aay bilaa nin yihiin.

Looma sina dhibaatooyinka guurka qasabka a' waxaanad ka arki kartaa awaaqibka ka dhasha oo aay ku kala duwan yihinn dhidiga iyo labka : ninku xornimadiisa wuu haystaa,lama xakumo haddii sineeysto,dhibaatooyin galmood lama kulmo, uur aanow rabinna lama kulmo...



Haddana...

**Waxa aad leedahay xuquuq la mida kuwa wiilasha !**



## B. SOBOBAHA LA SHEEGTO SI GUURKA QASAB LOOGA DHIGO<sup>5</sup>

Reeraha ama qoomiyadaha ku dhaqmaa guurka qasabka a' waxa aay ku dayanayaan bulshadooda,dhaqankookada ama dhaqaale ahaan..... Inkaste oo ujeedadodoo u muuqaato tu fiican(badbaado,isku taxaluujin mustaqbalka gabadhooda,ilaalin xiriirka ahlinimo...) haddana ugu danbeeyn waxa gabadhii laga hor jooga in aay noqoto qaan gaadh madax banaan waana waa jibka hore en walidka.

Si loo ilaaliyo dhaqanka,loo qadariyo cadooyinka ama diinta

Xaalada socdaalka,guurka qasbka a' ee u dhexeeya dadka isku dhaqanka iyo isku qoomiyada a',waxa uu u mataal qoysaska qarkood,iska ilaalin caalamka dibada iyo isku taxaluujin in aay ku xirnaadaan dalkoodii hooyo. Sidaas darteed,waxa aay qabaan in aay daacad u yihiin dhaqan weli ku nool maskaxdooda,dhaqankaas oo haddana aay dhacdo in su'aalo la iska weeydinaayo mararka qaarkood saxnaantiisa wadankoodii...



Ilaasho oo gudbi dhaqamadaada kuuma fasaxaayso dhibaataada guurka ka hor tagaaya rabitaanka xorta a' !

<sup>5</sup> Laga soo xigtay : Rapport sur la pratique des mariages forcés au Canada: entrevues avec des intervenant(e)s de première ligne. Une recherche exploratoire menée à Montréal et à Toronto en 2008. Naïma Bendriss

Si loo ilaaliyo dhaqanka, loo qadariyo cadooyinka ama diinta

Guurka qasabka a' waxa keeni kara tii oo reer kale oo isku qoomiyad la yahay loogu balan qaaday in gabadh la siiyo.

Markaas guurkaas waxa uu u noqon karaa waalidka fursad aay gabadhooda ula doonayaan nolol fiican ama ku lagu xoojinayo xiriirka labada qoys ee isku qoomiyada a'. Haddii aay isku reer yihiin labada is guursanaaysa waxa uu noqonayaa ku lagu illaalinayo maalka reerka.



**In kasta oo amniga maadiga ahi uu lagama maarmaan  
u yahay qoysaska oo dhan,haddana ku iman karo  
waxyeelada danahaaga iyo daacadnimadaada!**

Ilaalinta ama soo celinta sharafta qoyska

*L'honneur* représente l'estime et la considération portés à une personne lorsque celle-ci adopte une conduite digne, méritante, conforme à un certain nombre de règles établies par une communauté ou une société. L'honneur est donc synonyme de réputation, de dignité. L'opposé est la honte, le déshonneur...

waxa aay tahay qiimaha iyo qadarinta loo fidiyo qof dhaqan fiican le', mudnaan le', u foojigan qaab nololeedka qoomiyadda ama mushtamac. Sharafta waxaay tahay sumcad wanaagsan iyo mudnaan. Wixii ka duwan waa ceeb, sharaf jab.....

Qoomiyadaha qaarkood,waa in duruufo badan aad ku dhaqantaa si laguu garto in aad tahay gabadh is *qadarinasa* : raaliya a' , si fiicaan aad u labisato ,aanad wiilal xiriir lalahaayn,bikirkaaga ilaashato guurka hortii,aanad noqoto soowjad fiican iyo hooyo wanaagsan iyo wixii lahal maala. Haddii gabadh da' yar ka baxdo marxaladaas waxa loo arki karaa sharaf ku dhacday reerkooda. Wuxuu markaaas guurka loo isticmaalaya ilaalin ama soo celin sharaftii reeka.

*Amarkaas diidmadiisu waxa uu dhib u keenaya xiriirkii qoyska,cidii ka baxda amarkaasna waxa aay mudanaaysaa in la muxarimo.*<sup>6</sup>

Dhaqankaas waxa u markaas ka mid yahay ***dhibaatooyinka la xiriira shafta*** : Qaabka daran ee qof ama dhaawr qof oo reerka ihi aay ula dhaqmi doonaaan qofka aay u arkaan in uu sharaf jab ku keenay reerka taas oo gaadhi karta qoomiyadda dhamaanteed. Qaabkaasi waxa u keeni kara dhagar.

---

<sup>6</sup> *Laga soo xigtay : Rapport sur la pratique des mariages forcés au Canada : entrevues avec des intervenant(e)s de première ligne. Une recherche exploratoire menée à Montréal et à Toronto en 2008. Naïma Bendriess p.16*

!

**In rag iyo dumar si siman la isku ixtiraamo,tii oon lookala eegin dhidig iyo lab,maanay ka sharaf badnaateen in sharafti qoyska oio dhan adiga keliga dusha lagaa saaro?**

Ka bacdi xaamilo ka baxsan nikaaxa

Bikirnimada hablaha da'da yar dhaqamada qaarkood waxa aay ku fadhida qiimo weeyn,waxa aay ka turjumaaysaa sharafta iyo daahirada gabadha da'da yar iyo weliba sharafta reerka iyo qoomiyada.

Si kasteba ha noqotee bikirnimadu waxa aay gaar ku tahay gabadha dhalinta a',oo waxaan u soo laabanay fikradaha ku salaaysan jinsiga iyo saraaynta labka : wiil isagu galmooday wakhti guurka ka baxsan wax lagu haaystaa ma jирто si qalad ana looma arko.

Sidaas darteed waalidku waxa aay ku qasbaan gabadhooda in aay guursato aabihii ilmaha kaga dhalay guur lla'aan si loo soo cesho sharafti iyo sumcadii reerka.

!

**Bikirkaagii ha kaa lumo ama ilmo ku dhal guur la'aan adiga ayey kuu taalaa. Taasi kuguma kalifi karto guur qasab a' !**

### Ilaalinta gal moodka gabadhaada

Cabsi aay ka qabaan xaamilo ka baxsan guurka ama ayada oo bikir jabta, waalidka qaarkood gabadhooda waxaay u nikaaxaan ayada oo da' yar. Guurkaas , oo ilaalinaya sumcaddooda, waxa uu u saamaxa in aay ilaaliyaan gal moodka gabadhooda xajistaana awodii aabanimo.

Dhanka kale, had iyo jeerna kuxiran fikradaha ku saleysan jinsiga, waa wax aan macquul aheyn inay yeeshaan cunig le' aqoonsi aan u dhigmin rajoo yinka ku xiran jinsigiisa (sida noqoshada qof jinsi bedela) ama qof ka duwan lab (sida khaniis a' ama laba dhidig a'). Guurka qasbka a' waxa loogu dhaqmaa in lagu kabo sharafta qoyska iyo loogu daweyyo gal moodka dadka isku sinjiga a', taas oo sida loo arkaayo aan ahaayn,, isku taga dadka isku sinjiga a' ma aha xanuun, waa soo jiidasho dabeeecii a' oo jacaayl a' oo aad ku soo jiidanayso qofka kula midka a' aanad iska ilaaliln kareeyn.



**Xiriiradaada jacaayl, gal moodkaaga, qaabkaaga gal moodka...**

**Adiga umbaay ku khuseeyaan !**

## Badbaadinta gabadhaada da'da yar

Qoysaska ama qoomiyadaha qaarkood waxa loo arka hablaha in aay abidkood qaan gaadhin sidaas darteed waa in la badbaadiya wixii dantoodu ku jirtana lala qabto...

Waxaay markaas u arkan in gabadhoodu guurka ku badbaadeeyso,kana sii fiicantahay haddii ninku ka soo jeedo reerka ama qoomiyadda.

Sida aay dooniba ha noqotee,maaha macnuhu gabadhoodii ayaan qaan-gaadhi karila ama mas'uul iska noqon karila waxa aay waalidku arqalad ugu noqonayaan madax banaanida ilmahooda.



**Adiguba waad kartaa in aad mas'uul iska noqoto sida wiilkuba iskaga noqon karo. Haddii lagu siiyo fursad aad iskugu-tashato !**



## C. WAA MAXAY AWAAQIBYADA KA DHASHA GUURKA QASABKA A' ?

Qasab in laguugu guuriya waxa aay awaaqib ku yeelanaysa caafimaadkaaga jidh iyo maskax ahaan watana calaamadaha soo socda<sup>7</sup>:

### GUURKA HORTII

Cadaadis qoys iyo mushtamac ahaan

Raad raac iyo ilaalin +++

Halaasi,hatigaad,caay

Celintaan

(bixitaan,moobiil,lacag,cuno,shacigaaga,caga jugleeyn.....)

Lagaa mamnuuco in aad aado dugsi wax barasho

Karantiin,dareen keli ahaaneed

Dhibaatooyin nooc kaste le'

(afka a',jidhka a',maskaxiyen a'....) ,hanjabaad dil a'

Qalitaano ku saabsan dib u dhisida goowrka si loo  
xaqijiyo bikirninada awaaqib caafimaad,caabuqyada  
suurto galka a',sameeynta galmada...

Jaah wareerin,daacadnimo,cidhiidhi,dareen  
khayaano,luminta jahooyinko,kalsoonida naftaada iyi ta  
dadka kale oo kaa haloowda

7 Laga soo xigtay : GAMS Belgique, Mariage forcé et asile – Fiche spécifique 2, GBV & Asylum – Learn & act, Bruxelles, 2019.



## GUURKA DABADII

**Gal mood qasab a' (boobis a') bilaa badbaado a' :**  
Xaamilo aanad rabin

**Dhibaatooyin nooc kaste le'**  
(afka a', jidhka a', maskaxiyen a'...)

**Raad raac iyo ilaalin +++**

**Lagugu qasbo in aad joojiso dugsiga/ tababarka/ shaqada**  
- si aad ugu haawlanaato caruurta, guriga, gacalka

**Halawga xornimo, madax -banaanida mushtacmac**  
ahaaneed iyo dhaqaale ahaan

**Ka bogitaan la'aan cunada, ka bogitaan la'aan hurdada**

**Dareen xishood, sharaftaada iyo isku kalsoonida oo**  
dhaadhacda, karaahi iyo walaac

**Niyad jab, is dhaawicid, fikrado is-dil a'**

IV.



## GUURKA HORTII CALAAMADAH DIGNIINTA :

Laga bilaabo yaraantaadii,tafaaasiil qarkood,oo aad u malaayn karto caadi,ayaa si kale kuu tilmaami kara in aad foojignaato :

- > Ka soo qaad adiga oo la nool qof aaydaan ahaayn isku dhaqan ama diin. Waalidkaa ma ogola xiriirkaas,sida aad u fikirto ama aad dharka u xidhato ;
- > Waxa aad xiriir la leedahay wilaal,waalidkun waxa uu ka cabsi qabaa «maxaa la odhan doonaa» ;
- > Reerkiinu waxa uu kormeela bixitaa nadaada,xiriiradaada,khaasatan marka aay yihiin wiilal-hada kadibna keli ma socon kartid ;
- > Qoyskiinu waxa uu kaala hadlaa kuna tusa sawirada rag aay jeclaayeen in aay ku baraan sawiradaadana aay tuseen....;
- > Waxa aad gara naaysaa gabadh walaasha a' ama ina adeerta a' oo qaabkaa loogu guuriyey,aay dhici kartana in aad ka qayb gashay carooskeedii ;
- > Reerku wuxuu ku talo jira in uu fasax ku aado dalkaagii ama koodii. Waad ku deg-deg santahay in aad socoto,waxanad qabtaa dareen in wax laguu qarinaayo. Waxa laga hadlayaa xaflad,laakiin ma garanaaysid cida ama waxa loo dhigayo ;

- > Wuxuu lagaa qaadi kara telefon kaaga ama koobuyuutar kaaga. Taasina waxaaay adkeey neeysaa ilaaqaadkii dibada ;
- > Qooysku waxa uu kaa mamnuucay saxiibtinimada qaarkood»oon adiga ku fiicneeyn»bixitaanada dugsiga kama qaayb geli kartid,xataa dugsiga ma tagi kartid ;
- > Qooysku waxa uu ku adkeeysanayaa in guurku muhiim u yahay mustaqbalkaaga. Kal gacalkaaga iyo daacadnimadaada waxa loo isticmaali karaa si aanad u diidin guurka ;
- > Ahligaagu wuu ku hatigay ama kuu hanjabay haddii aad diido guurkaas (lagaa joojiyey bixitaanka,cunada,xornimada,hatigaad,jidh dil...) ;
- > Rabshadu waxaaay taaban karta jidhka (dhirbaaxooyin,leed...) maskaxiyan (cadaadis,ceeb qiiro le' ), afka (qaaylo , caay...) ama qalab ahaan iyo maamul ahaan (xaqal jeebka,telefonka iyo ama sharcigaaga oo lagaa qaado) ;

Wuxuu dhici kara in dhibaatooyin kala duwan mar keliya laguu geeysto.



**Si waliba ha noqotee,haddii aad su'aalo is weeydii naso waa  
haddi arqaladi jirto. Waa in aad deg-deg uga hor  
tagto leeynoo guurka qasbka ihi dhibaatooyin culus  
ayuu kuu leeyahay !**

Marka uu kaa hor yimaad guur qasab ihi,taladu waay kaa luntaa,ma garatid wax aad yeedsho,si aad u ga hor tagtto,cabsi ayaa ku gasha...Waay kugu adkaataa in aad ka hor tagto go'aanka reerka,jacaaylka waalidka ,xiriirka dhiga waay awood badan yihiin. Waxa kale oo murugo badan in aad u dhaqaqdo jaho aanad hubin oo aad heshid awoodii,,qalbi adaaygii aad noloshaada ugu tashan lahaayd.

Balse,ka cararka guurka qasabka ihi wuxu kugu kalifaya in aad u jilib dhigto,leeynoo waa marxalad deg-deg a',waxa aanay kuu sama xeeysa in aad ka badbaado awaaqibka culus ee kor ku dhigan.



**Waxa u horeeya ee aad sameeyn waxa aay tahay in aad ka gilgilato,keli aanad noqon oo aad kala hadasho dad ka baxsan reerka. Marka xigta, aad la xiriirto sida ugu dhakhsobadan ururada ururada takhasuuska ku a' arimahan ( Cinwaanada xaashada 10).**

Waxa jira ururo takhasuus a' oo caawin kara garbina kara hablaha,waxa aay leeyihinn koox ku shaqo le' (gargaar maskaxiyan a',sharciyan a' ,bulsho ahaaneed...).

Codsiga gargaarku ma fududa had iyo jeer,gaar ahaan marka marka aanad aqoon u lahaay qaabka aay u socdaan caawimaadka xarfadeed Waa in aad garato la kulanka xafiiska takhasuska ihi in uu kaaga damaanad qaadayo :

- > waliidka iyo reerkiinu toona in aanay ogaan karin imaatinkaagaa iyo wixii aad u sheegatay. Kooxda waxa xidhaaysa sirta shaqada umana sheegi karaan wada hadalka reerkiina ;
- > Cid aad ku kalsoon tahay waay kula socon kartaa (macalin,saaxiibad,shaqsi ka mid a' PMS ta dugsigaaga,iyo wixii lahal maala.) ;
- > Wax lagugu soo dhaweeyn bila xukun iyo niyad furan. Kooxdu adiga ayeey kuu joogta ,in aay dhegeleysato cabsidaada iyo baahidaada,qadariso doorashada.
- > Waxa lagugu hagi doonaa lagaana tageeri doona dadaalkaaga hadba xaaladu sida aay tahay :tusaalo gargaar xaga sharciga a' waajahsan xuquuqdaada,gargaar lacageed ama codsi guri iyo wixii kale ;
- > Waxa suurto gal a' haddii aay jirto xaalad deg-deg a' in lagu dejijo guri soo dhaweeyn inta xalal la helayo ama in ka dheer,cilwaankuna sir yahay amnigaaga la ajligeed.

Waxa rasmi a' in aad keento **sawiro sharchiyadaada oo dhan**.

*Warqadahaas waxa aay muhiim u yihiin dadaalkaaga dhanka maamulka,furitaanka xuquuda ,codsiga caawinaad... waa muhiim in aad mar kaste haaysato.*



V.



## **UGU DANBEEYN**

Go'aanso in aad ka hor tagto reekiina oo u tasha noloshaada waa go'aan aad u culus keenana xanuun badan. Taasi waxa aay u baahantahay qalbi adeeyg weeyn. Balse ,keli ma tihid,talaabo kaste oo aay tahay in aad dhaaftana,waxa aad heli karta garab haddii aad u baahato !



**HA KU  
NOQON KELI,  
TAGEERO WAAY  
JIRTA !**

## ILAHA LAGA SOO XIGTAY

- > Amnesty Jeunes, Définition du consentement, la notion de consentement, 2020.
- > Fondation Roi Baudouin, *Temps des vacances: temps de mariage?* Bruxelles, 2008.
- > GAMS Belgique, *Mariage forcé et asile – Fiche spécifique 2*, GBV & Asylum – Learn & act, Bruxelles, 2019.
- > Maison Plurielle ASBL, COLLOQUE INTERNATIONAL SUR LES MARIAGES FORCÉS ET VIOLENCES LIÉES À L'HONNEUR. *Réalités et contraintes de terrain: ambivalence et danger de la médiation familiale*, Charleroi, 2017.
- > Maison Plurielle ASBL, *Mariage forcé et violences liées à l'honneur: quel accompagnement?* Charleroi, 2019.
- > Maison Plurielle ASBL, *Projet Pédagogique de sensibilisation sur le Mariage Forcé*, Charleroi, 2020.

- > Ministère de la Communauté française, *Mariage choisi, mariage subi: quels enjeux pour les jeunes ? Faits & Gestes* n°15, 2004.
- > Forced Marriage Unit, *Multi agency-practice guidelines: Handling cases of Forced Marriage*, United-Kingdom, 2014.
- > Institut pour l'égalité des Femmes et des Hommes, *Définitions du mariage de complaisance, mariage forcé, mariage précoce, mariage gris en mariage arrangé*, Bruxelles, sans date.
- > Institut pour l'égalité des Femmes et des Hommes, *Mariage forcé ? Guide à l'usage des professionnel.le.s*, Bruxelles, 2015.
- > UNICEF, *Ending Child Marriage: Progress and Prospects*, 2014.

## NOTES

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

## NOTES

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

## NOTES

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

## NOTES

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

## NOTES

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

Qoraalkan waa fikirkii xogaye daawladeedka u xil saaran sinaanta nasiibyada,Nawa Ben Hamou lana xiriirsan hanaanka joojinta dhibaatooyinka,hanaanka bruxelles ee la dagalaalanka dhibaatoyinla lagu hayo haweenka.

**Dajiyaha mas'uulka a':**

Rochdi Khabazi

Maamulaha guud

Bruxelles Pouvoirs locaux

Place Saint-Lazare 2

1035 Bruxelles


[www.pouvoirs-locaux.brussels](http://www.pouvoirs-locaux.brussels)

**Sawirada:**

[www.trinome.be](http://www.trinome.be)



Cette publication a été imprimée à l'aide d'encre végétale sur papier répondant au label FSC mix



Laga bilaabo baaluqaagii,waxaad maqasha in reerku diyaarinayo guurkaaga.

Guurkaas farxad weeyn ayuu gelin doonaa,waxa aad sii wadi doontaa cadooyinkii,sharaf baand u yeeli doontaa reerka oo dhan. ku dar iyagana waxuu u yahay damaanad farxaddaada iyo amnigaaga a'. Adiguse diyaar uma tihid,waxaad rabtaa in aad sii wadato waxbarashada,asaxaabtaa aragto,weli kama fikirtid in aad guursato,caruur yeelato.....

Sidaas darteed waxaad ka cabsi qabataa niyad jab reerka a' hadaad buuxin weeydo sugitaann kooda...

Diidi taanku ma keeni karaa in aad weeydo iyaga kelina aad ku dhacdo ? Sideed daacad ugu noqon kartaa reekiina iyo naftaada ? Maxa dhici kara haddii aad tidhaa « maay » ?

Daraasadan waxa aay kaa caawinaaysaa in aad si cad wax u aragtid,aad qaadatid darriqada aad rabto,iayada oo dad badana diyaar kuu yahay in lagaa caawiyo,lagu garbiyo doorashadaadana lagugu hanuuniyo.



**BRUXELLES POUVOIRS LOCAUX  
BRUSSEL PLAATSELIJKE BESTUREN**

SERVICE PUBLIC RÉGIONAL DE BRUXELLES  
GEWESTELIJKE OVERHEIDS Dienst BRUSSEL

Service public régional de Bruxelles  
Bruxelles Pouvoirs locaux  
Place Saint-Lazare 2  
1035 Bruxelles  
[www.pouvoirs-locaux.brussels](http://www.pouvoirs-locaux.brussels)

Kayd sharci a' : 2021/11.404/4/12

